King County

Office of Law Enforcement Oversight (OLEO)

Maarso 20, 2023

KU:	Patti Cole-Tindall, Sheriif, Xafiiska Sheriif ka Degmada King (King County Sheriff's Office)
NUQUL:	Jesse Anderson, Ku Xigeenka Sheriif ka, Xafiiska Sheriif ka Jonathan Hoffman, Maareeyaha Heerarka Xirfadeed, Xafiiska Sheriif ka Karan Gill, Ku Xigeenka Madaxa Shaqaalaha, Xafiiska Fulinta ee Degmada King (King County Executive Office, KCEO) Anita Whitfield, Madaxa Sinaanta iyo Ka-Qaybgalka, KCEO
KA SOO BAXAY:	Tamer Abouzeid, Agaasimaha, Xafiiska Kormeerka Fulinta Sharciga (Office of Law Enforcement Oversight, OLEO)
KU SAABSAN:	Adeegsiga Turjumaannada, Buugga Amarada Guud (General Orders Manual, GOM) 16.04.000 iyo GOM 6.00.000

Jawaab ahaan u gudbin Lambarka Baarista Gudaha ee yahay IIU2022-175, OLEO waxay dib u eegis ku sameysay GOM 16.04.000 ee Xafiiska Sheriif ka oo ku saabsan Adeegsiga Turjumaannada. Sida ku xusan warqadda OLEO ee loo diray Cutubka Baaritaanka Gudaha (Internal Investigations Unit, IIU) ee Nofeembar 30, 2022, GOM 16.04.000 waxay qeexaysaa qaar ka mid ah shuruudaha la xiriira goorta iyo sida turjumaannada loo isticmaalo, balse waxay inta badan khuseysaa oo keliya turjumaada luuqadda calaamadaha ee dadka dhaga la'aanta ah waxayna si ku filan ugu gudbin waayeen nidaamyada la xiriira isdhexgalka dadka leh Aqoon Xaddidan oo luuqadeed (Limited English Proficiency, LEP).

Intaas waxaa sii dheer, sida lagu qeexay GOM 6.00.000 ee ku saabsan Adeegsiga Awoodda, shaqaalaha ayaa lagu wargeliyay in ay tixgeliyaan caqabadaha luuqadda marka ay sameynayaan go'aannada ku saabsan isticmaalka awoodda jidheed. Si kastaba ha ahaatee, siyaasadda wax faahfaahin dheeraad ah kama bixin ilaha lagu helo turjumaadda luuqadaha ama nidaamyada lagu soo warbixiyo caqabadaha luuqadda iyo adeegsiga awoodda.

Si cadeynta iyo waafaqsanaanta loo gaaro, Xafiiska Sheriif ka waa inuu soo saaraa oo qaataa siyaasadda luuqadda oo dhammeystiran oo la jaanqaadeysa tilmaamaha federaalka, Xeerarka Degmada King (King County Code, KCC §2.15.030), Shuruudaha Galitaanka Luuqadda iyo Isgaarsiinta ee Degmada, iyo habraacyada ugu wanaagsan ee qaranka. **Warqaddan ayaa**

qeexaysa Talo ku saabsan dib-u-eegista siyaasadda Xafiiska Sheriif ka ee Cutubyada 16 iyo 6 ee GOM si loo hagaajiyo galitaanka luuqadda ee dadka dhaga la'aanta ah iyo dadka leh LEP. ah.

Si ay ugu diyaar garowdo soo jeedinta talooyin ku saabsan isbedellada siyaasadda, OLEO waxay dib u eegis ku samaysay siyaasadaha luuqadda ee goobaha kale iyo cilmi-baarista ugu wanaagsan ee ka socota Waaxda Caddaaladda,[i] Ururka Caalamiga ah ee Taliyayaasha Booliska (International Association of Chiefs of Police),[ii] iyo Machadka Vera ee Caddaaladda (Vera Institute for Justice).[iii]

Iyadoo ujeedadu tahay in la xaqiijiyo isgaarsiinta saxda ah iyo helitaanka adeegyada Xafiiska Sheriif ka ee dhammaan dadka, iyadoon loo eegin luuqadda asalka ah,[iv] asalka qoomiyadeed ama naafonimada, OLEO waxay soo saartay Talon soo socda:

TALO-SOO-JEEDINNO 1.

Qeex in adeegyada turjumaada la bixiyo inta lagu jiro hawlgal kasta oo la xiriira fulinta sharciga oo lala yeesho qof dhaga la' ama dadka leh LEP ah.

Hadda - oo waafaqsan Xeerka Dib-u-Eegista ee Washington (Revised Code of Washington, RCW) 2.43.120 - GOM 16.04.000 waxay qeexaysaa xaaladaha marka turjumaada luuqadda calaamadaha lagu soo waco, tusaale ahaan, dadka dhaga la'aanta ah. Siyaasadda kuma jirto wax tilmaamo ah oo la xiriira dadka leh LEP ah.

Talo OLEO waa in turjumaadda lala xiriiriyo hawl kasta oo la xiriira fulinta sharciga oo lala yeelanayo qof dhaga la' ama LEP ah ilaa qofka laftiisu codsado si kale[v] iyo marka la wareysanayo ilmo yar oo waalidkiis, ilaaliyihiis, ama masuuliyihiis yahay qof dhaga la' ama dadka leh LEP ah. Haddii la xiro qof dhaga la' ama dadka leh LEP ah, dhammaan wareysiyada waa in dib loo dhigaa ilaa laga helo turjumaan.

Taloni waxay meesha ka saarayaan xaddidnaanta lagu sheegay in loo waco turjumaan kaliya isdhexgalka la xiriira baaritaanka dambiyada waxayna siyaasadda Xafiiska Sheriif ka la jaanqadaysaa tilmaamaha federaalka iyo xeerarka Degmada King ee u baahan in loo helo adeeg luuqadeed oo siman dhammaan adeegyada.[vi] Sidoo kale, OLEO waxay ku talineysaa in marka Xafiiska Sheriif ka loogu yeero dhacdo ku lug leh qof dhaga la' ama dadka leh LEP ah, adeegyada turjumaada lagu bixiyo goobta.[vii] Xafiiska Sheriif ka waa inuu la shaqeeyaa Xafiiska Degmada ee Sinaanta, Midnimada iyo Caddaaladda Bulshada si loo dejiyo nidaam lagu soo waco turjumaanada karti u leh ee goobta.[viii]

TALO 2.

Caddee in turjubaanada loo yeeran doono marka ay jiraan howlo sharci fulin, iyadoon loo eegin qofka xaaladdiisa dhibane, markhaati, ama tuhmane.

Siyaasadda hadda ee Cutubka 16 waxay sheegaysaa in turjubaan luuqadda calaamadaha loo yeeri doono dhibbane ama markhaati maqalka naafo ka ah. Si kastaba ha noqotee, sharciga gobolka wuxuu caddeynayaa in turjubaan la yeeran doono haddii qofku yahay dhibbane, markhaati, ama tuhmane[ix].

TALO 3.

Sharciyeey adeegyada turjubaannada dheeraadka ah ee loogu talagalay shaqsiyaadka LEP (Shaqsiyaadka Awood Yar ee Ingiriisiga) oo ka baxsan Khadka Luqadaha ee AT&T (AT&T Language line).

Siyaasadda hadda ee Cutubka 16 uma bixiso habraac ku saabsan tarjumaadda ay sameeyaan turjubaanada aqoonta u leh ee goob-joogga ah ama askarta af-labaad.[x] OLEO waxay soo jeedineysaa (a) adeegsiga turjubaanada aqoonta u leh, oo ay ku jiraan askarta af-labaadka ee Xafiiska Sheriff-ka, kuwaas oo shahaado haysta oo tababar gaar ah u leh turjumaadda oo ku habboon macnaha sharciga ciqaabta, iyo (b) in turjubaanada goob-joogga ah mudnaanta la siiyo marka loo eego kuwa khadka telefoonka.[xi]

OLEO waxay soo jeedineysaa in la isticmaalo turjubaanada aqoonta *u leh* ee goob-joogga ah marka xabsiga la dhigayo qof. Haddii turjubaanka goob-joogga ah la waco oo aan la heli karin, xubnuhu waa inay arrintaas diiwaangeliyaan oo ay isticmaalaan turjubaanka telefoonka sida khadka luuqadda. Turjumaadda aqoonta leh waa in la qasab yahay marka lagu wargelinayo xuquuqda dastuuriga ah, baaritaanada, ama qaadista bayaanada. Habka ugu wanaagsan waa in loo turjumo oo nuqulo qoraal ah loo bixiyo ogeysiisyada Miranda ee shaqsiyaadka maqalka naafada ka ah ama dadka luuqadda Asalka ah oo leh LEP si loo hubiyo saxnaanta.[xii] Waa in turjubaanku goobta joogo haddii qofku akhriyi waayo ama uu su'aalo ka qabo xuquuqdiisa.

Intaas waxaa sii dheer, OLEO waxay soo jeedineysaa in talo dheeraad ah oo turjumaadda ah lagu daro ogeysiisyada Miranda,[xiii] sida luuqadda soo socota:

> "Haddii aad maqalka naafada ka tahay ama Ingiriisigu uusan ahayn luuqadda asalka ah, Xafiiska Sheriff-ka Degmada King wuxuu kugu leeyahay waajib inuu kuu keeno turjubaan adigoon bixin wax lacag ah isla markaana dib u dhigayo wareysiyada inta uu imanayo turjubaanka."

TALO 4.

Ballaadhi xayiraadaha ku saabsan cidda aan noqon karin turjubaanka oo ku dar hawlaha booliiska ee shaqsiyaadka dadka leh LEP.

Buugga Amarada Guud GOM 16.04.025 waxay hadda u jeedisaa askarta in aysan isticmaalin saaxiibo ama xubno qoys oo loogu talagalay turjumaadda luuqadda calaamadaha. Si loo

helo isku midnimo, isla nooca xayiraaddu waa inay ku faafto dhammaan noocyada turjumaadda, oo aan kaliya ahayn turjumaadda luuqadda calaamadaha.

Sidoo kale, OLEO waxay soo jeedineysaa in xayiraadahaan la balaadhiyo si loo joojiyo isticmaalka saaxiibada, xubnaha qoyska, mutadawiciinta, dadka kale, ama carruurta in loo adeegsado turjumaad hawlaha booliiska, haddii aanay jirin sabab amni oo degdeg ah oo u baahan isgaarsiinta. Wadahadal kasta oo la adeegsado turjubaanka aan la aqoonsan waa in lagu duubaa kamarad jirka ama qalab duubista codka (haddii qofka saddexaad ama qofka dadka leh LEP uu diido duubista, diidmada waa in la diiwaangeliyaa). Wixii macluumaad ah ee laga helay turjubaanka aan la aqoonsan waa in turjubaanka aqoonta leh lagu hubiyaa sida ugu dhaqsaha badan. Tilmaamo dheeraad ah oo warbixineed waa in la hirgeliyaa si loo diiwaan geliyo nooca degdegga ah iyo isticmaalka turjubaanada aan la aqoonsan.

TALO 5.

Ku dar siyaasadda iyo nidaamka lagu ogaanayo luuqadda asalka ah ee shaqsiga.

Ma jiro habraac hadda oo lagu tilmaamay oo gacan ka geysanaya in askartu ay ogaato luuqadda asalka ah ee shaqsiga. Meelo kale oo la mid ah waxay askarta siiyaan kaarka "I Speak", kaas oo Xafiiska Sinnaanta, Isku Kalsoonida Bulshada iyo Cadaaladda Bulshada ee Gobolka horey u sameeyey si loogu isticmaalo luuqadaha 36 ee ugu badan ee looga hadlo gobolka.[xiv] Xafiiska Sheriff-ka waa inuu la shaqeeyaa Barnaamijka Helitaanka Luuqadda Gobolka[xv] si uu u habeeyo agabkan si ay ugu adeegaan askarta oo si ay u qeexaan habraacyada lagu aqoonsanayo luuqadda asalka ah ee ku xusan GOM 16.04.000.

TALO 6.

Ku dar luuqad ku saabsan isticmaalka qalabka caawinta kale iyo qoraalka.

Sida loo qoray, Buugga Amarada Guud GOM 16.04.000 ma bixin wax tilmaam ah oo ku saabsan isticmaalka qalabka caawinta.[xvi] Tilmaamaha federaalka waxay u baahan yihiin in la aqbalo codsiga qofka naafada ah ee ku saabsan qalabka caawinta ee kale, haddii aanan jirin hab kale oo isgaarsiineed oo waxtar leh.[xvii]

OLEO waxay soo jeedineysaa in la raacdo luuqadda dheeraadka ah oo ku saabsan dalabka qalabka caawinta ee kale. Dhammaan codsiyadaas waa in lagu diiwaangeliyo warbixinta askariga. OLEO sidoo kale waxay soo jeedineysaa haddii xubintu diido codsiga qofka maqalka naafada ka ah ee ku saabsan qalabka caawinta ee kale si uu u isgaarsiiyo, xubintaas waa inay diiwaan geliso oo bixiso sabab diidmada warbixintooda.

Intaas waxaa sii dheer, si loo hubiyo helitaanka adeegyada, siyaasaddu waa inay caddeysaa in shaqsiyaadka maqalka naafada ka ah la siiyo helitaanka mashiinka qoraalka (TTY, oo sidoo kale loo yaqaan qalabka isgaarsiinta dadka maqalka naafada ka ah, ama TDD) si ay ugu sameeyaan wicitaan kasta halkaas oo qof aan maqalka naafo ka ahayn

heli karo telefoon. Xubnuhu waa inay sidoo kale aqbalaan wicitaannada ay sameeyaan dadka maqalka liita iyagoo adeegsanaya Adeegga Relay Telecommunications.[xviii]

TALO 7.

Samee shuruudo dheeri ah oo warbixin ah si loo diiwaan geliyo maqal la'aanta ama caqabadaha luuqadda.

Inkastoo Buugga Amarada Guud GOM 16.04.030 hadda ay ka codsaneyso askarta inay soo sheegaan adeegsiga turjubaanka luuqadda calaamadaha, OLEO waxay soo jeedineysaa in shuruudaha soo gudbinta la ballaariyo oo ay ku jiraan diiwaangelinta:

- joogitaanka naafanimada maqalka ama caqabadaha luuqadda;
- codsiyada loo gudbiyey iyo isticmaalka ama diidmada qalabka caawinta ee dibadda ah;
- habka ay askartu ku aqoonsadeen luuqadda asalka ah ee qofka;
- isticmaalka turjubaanka taleefanka sida adeegsiga khadka luuqadda;
- isticmaalka turjubaanka aqoonta leh; iyo
- adeegsiga asxaabta, xubnaha qoyska, mutadawiciinta, dadka kale, ama carruurta loo adeegsaday tarjumaad ahaan iyo xiriirka ay la leeyihiin qofka la wareysanayo.

TALO 8.

Bedelka bixinta digniinta kahor isticmaalka xoogga si loogu wargeliyo askarta inay tixgeliyaan suuragalnimada maqal la'aan ama caqabad luuqadeed oo laga yaabo inay caqabad ku noqoto fahamka ama u hoggaansamidda.

Buugga Amarada Guud GOM 6.00.000 waxay xubin kasta ku amartaa inay is-baraxaan, bixiyaan digniin afka ah, iyo inay siiyaan fursad macquul ah oo lagu hoggaansamo ka hor inta aysan hub ama ikhtiyaarka xoog kale isticmaalin. Iyagoo raacaya hab-dhaqanka hay'adaha kale,[xix] OLEO waxay soo jeedineysaa in lagu daro luuqadda soo socota:

> "Xubnuhu waa inay maskaxda ku hayaan in suuragal ay tahay in maqal la'aanta ama caqabad luuqadeed ay curyaamiso fahamka awaamiirta. Xaaladahaas, xubnuhu waa inay isku dayaan inay aqoonsadaan habab kale oo ay ugu gudbin karaan digniin haddii ay suurtagal tahay."

TALO 9.

Waa in la soo sheegaa joogitaanka astaamaha iyo xaaladaha la taxay iyo saameyntooda go'aan gaarista muhiimka ah ee ku saabsan isticmaalka xoogga.

Buugga Amarada Guud GOM 6.00.000 ee dhowaan la daabacay ee ku saabsan Isticmaalka Xoogga waxay ku amreysaa askarta inay tixgeliyaan astaamo iyo xaalado badan oo ay ku jiraan caqabada luuqadda kahor isticmaalka xoogga.[xx]

Si kastaba ha ahaatee, Buugga Amarada Guud GOM 6.01.000 ee baaritaanka/soo sheegida isticmaalka xoogga iyo dhacdooyinka halista ah kama aanay tilmaamin goorta ama sida

loo diiwaan gelinayo joogitaanka astaamaha iyo xaaladahaas. OLEO waxay soo jeedineysaa in la hirgeliyo shuruudo dheeri ah oo warbixineed si loo diiwaan geliyo:

- joogitaanka mid kasta oo ka mid ah astaamaha iyo xaaladaha ku taxan siyaasadda, si gaar ah siyaasaddan ujeedadeeda dib u eegis ahaan, joogitaanka caqabad luuqadeed;
- digniino kasta ama amarro la bixiyey; iyo
- fahamka awaamiirtaas.

---

[i] Wasaaradda Cadaaladda ee Maraykanka, (U.S. Department of Justice), "Hagaha Kheyraadka LEP ee Fulinta Sharciga," ("LEP Resource Guide for Law Enforcement"),n.d., https://www.dhs.gov/sites/default/files/publications/lep-resouce-guide-law-enforcement 0.pdf.

[ii] Bharathi S. Venkatraman, "Luuqadda Laga Maqnaaday: Dadka Aqoonta Xaddidan ee Luuqadda iyo Booliska," ("Lost in Translation: Limited English Proficient Populations and the Police"), *Taliyaha Booliska*, (Police Chief Magazine), 73:4, 2006, Ururka Caalamiga ah ee Taliyayaasha Booliska (International Association of Chiefs of Police), https://www.policechiefmagazine.org/lost-in-translation-limited-english-proficient-populations-and-the-police/?ref=b34840803136937f3b3e631e13395e51.

[iii] Susan Shah, Insha Rahman, iyo Anita Khashu, "Ka Gudbida Caqabadaha Luuqadda: Xalka Fulinta Sharciga," ("Overcoming Language Barriers: Solutions for Law Enforcement"), Machadka Cadaaladda Vera (Vera Institute of Justice) iyo Adeegyada Fulinta Sharciga ee Bulshada ee Wasaaradda Cadaaladda ee Maraykanka, 2007, https://www.vera.org/publications/overcoming-language-barriers-solutions-for-law-enforcement iyo Susan Shah iyo Rodolfo Estrada, "Buundada Caqabadda Luuqadda: Habraacyada Waxtarka Leh ee Fulinta Sharciga," ("Bridging the Language Divide: Promising Practices for Law Enforcement"), Machadka Vera ee Caddaaladda (Vera Institute for Justice), 2009, https://www.vera.org/publications/bridging-the-language-divide-promising-practices-for-law-enforcement.

[iv] "luuqadda Asalka ah" ("Native Language") waxay la micno tahay luuqadda uu qofku ugu waxtarka badan yahay in uu isku muujiyo. (Ilaha Qeexitaanka: Amarka Guud ee Waaxda Booliska San Francisco 5.20.)

[v] Eeg Talo 6 ee faahfaahinta kaabayaasha dheeraadka ah.

[vi] Wixii soo koobidda shuruudaha khuseeya oo dhammeystiran, eeg Xafiiska Sinaanta iyo Caddaaladda Bulshada ee Degmada King ee (King County Office of Equity and Social Justice), Shuruudaha Galitaanka Luuqadda iyo Isgaarsiinta, (Language Access Requirements and Communication), https://kingcounty.gov/~/media/elected/executive/equity-social-justice/Immigrant-and-Refugee/LanguageAccessOrd/Language-Access-Requirements.ashx?la=en.

[vii] Tusaale ahaan, eeg Buugga Waaxda Booliska Seattle (Seattle Police Department Manual) 15.250.F.3. – Turjubaanada iyo Turjumaannada (Interpreters and Translators),https://www.seattle.gov/police-manual/title-15---primary-investigation/15250---interpreters-and-translators.

[viii] Eeg Talo 3 si aad u hesho wada hadal ku saabsan turjubaanada aqoonta u leh ee qof ahaan goob-joogga ah.

[ix] Eeg RCW 2.42.120.

[x] Qaybta keliya ee Buugga Amarada Guud GOM 16.04.00 ku saabsan Adeegsiga Tarjumaannada (Use of Interpreters) ee khuseeya shakhsiyaadka dadka leh LEP waa 16.04.035 oo qeexaysa nidaamka loo adeegsanayo Khadka Luqadda ee AT&T (AT&T Language Line).

[xi] Eeg tusaale ahaan, Amarka Guud ee Waaxda Booliska San Francisco (San Francisco Police Department General Order) 5.20, Qeybta III (D), Adeegyada Helitaanka Luuqadda ee loogu talagalay Shaqsiyaadka Aqoon Xaddidan oo luuqadeed (LEP) (Language Access Services for Limited English Proficient Persons), Amar Muhiim ah https://www.sanfranciscopolice.org/sites/default/files/2018-

11/DG05.20%20Language%20Access%20Services%20for%20Limited%20English%20Proficient%20%28LEP%29%20Persons.pdf.

[xii] Manuel Triano-López, "Marxaladaha ka hor ee xabsiga iyo su'aalaha booliiska: Saameynta ay ku leeyihiin Turjubaanada iyo Turjumaannada gudaha Maraykanka" (Pre-arrest Stages and Police Questioning: The Impact of Interpreters and Translators in the U.S.).

[xiii] Eeg tusaale ahaan, Buugga Waaxda Booliska Seattle 6.150 – Ku Wargelinta Shaqsiyaadka Xuquuqda Qareenka iyo Miranda (9) "Saraakiishu Waa inay ku daraan Digniin Dheeraad ah oo loogu talagalay Dadka Maqalka Naafada Ka Ah", https://www.seattle.gov/police-manual/title-6---arrests-search-and-seizure/6150---advising-persons-of-right-to-counsel-and-miranda.

[xiv] Eeg Kaarka "I Speak" ee Gobolka King (King County "I Speak" Card), https://kingcounty.gov/~/media/elected/executive/equity-social-justice/Immigrant-and-Refugee/LanguageAccessOrd/I_Speak_Cards_FINAL.ashx?la=en.

[xv] Eeg Barnaamijka Helitaanka Luuqadda ee Gobolka King (King County Language Access Program), https://kingcounty.gov/audience/employees/translation-interpretation.aspx.

[xvi] Qalabka caawinta ("Auxiliary Aids") waa agab loo adeegsado isgaarsiinta dadka naafada ah ama qaba curyaannimada. Waxay ku jiri karaan, laakiin kuma koobna, isticmaalka muujinta ama agabka muuqaalka; buug gacmeed ama qalin/pin si qoraal ah loo beddelo; kumbuyuutar ama mashiinka qoraalka; nidaamka maqalka ee caawinta si uu u xoojiyo codka; qoraalka (TTY) ama muuqaalka (adeegga isgaarsiinta muuqaalka [video relay service, VRS]); qoraal duuban; akhriyaal aqoonta u leh; ama turjubaan aqoonta u leh. (Ilaha Qeexitaanka: Buugga Siyaasadda Waaxda Booliska ee Spokane [Spokane Police Department Policy Manual] 370.)

[xvii] Waaxda Caddaaladda Mareykanka, Qeybta Xuquuqda Naafada (U.S. Department of Justice, Civil Rights Division), "Su'aalaha Caadiga ah ee ku saabsan Sharciga Naafada Mareykanka iyo Hawlaha Booliska," ("Frequently Asked Questions About the Americans with Disabilities Act and Police Activities") 2020, https://archive.ada.gov/q&a_law.htm.

[xviii] Eeg tusaale ahaan, Buugga Tilmaamaha Waaxda Booliska Portland (Portland Police Bureau Manual) 06.40.36 Isgaarsiinta Shaqsiyaadka Maqalka Naafada Ka Ah iyo Shaqsiyaadka LEP (Communication with Hearing-Impaired and LEP Persons), https://www.portlandoregon.gov/police/article/533213.

[xix] Eeg tusaale ahaan Buugga Tilmaamaha Waaxda Booliska ee Portland (Portland Police Bureau Manual), 1010.00 Isticmaalka Xoogga (Use of Force), 5.1.1 https://www.portland.gov/policies/police-directives/weapons-ammunition-equipment-1000/101000-use-force.

[xx] Astaamaha iyo xaaladahaasi ("Circumstances and Conditions") waxaa ku jira: xaaladda caafimaadka; uurka; da'da; astaamo caafimaad, dabeecad, ama curyaannimo; qaladaadka aragtida ama garashada ee la xiriira isticmaalka daroogada ama aalkolada; fikirka
is-dilka; caqabada luuqadeed; ama joogitaanka carruurta.